NEWBORN SCREENING ONTARIO
DÉPISTAGE NÉONATAL ONTARIO

Baaritaanka Dhallaanka Cusub iyo Dhallaankaaga:
Bilow cusub ayaa waxay u horseedaa nolol caafimaad leh

Oggaansho horena waxay u horseedaa daawayn hore

Sida waalid cusub ama hadda filanaya, caafimaadka dhallaankaaga muhiimad weyn ayay kuu leedahay. Carruurta qaarkood waxaa dhici karta in ay ladnaan ka muuqato, balse halis ay ugu jiraan dhibaatooyin caafimaad oo daran haddii ay qabaan cadur aan lagu tuhmin oo aan horeyba laga daaweyn. Si dhallaankaaga aad uga caawin la'hayd in noloshooda si wanaagsan ku biloowdaan, ubadkaaga iminka ku dhashey - iyo mid kasta oo kale oo iminka Ontario ku dhashey - waxaa loo fidin doonaa baaritaan laga baarayo ku dhowaad 29 cudurro kala duwan. Inkastoo cuduradan ay dhif yihiin, kudhowaad 140,000 dhallaan ayaa sanad kasta Ontario ku dhasha intaas dhashey 200 ayay ka saameysaa. Hadafka laga leeyahay baaritaanka ogaanshaha hore – ayaa waxay tahay si daaweynta goor hore loo bilaabi la'haa oo caafimaad wanaagsan loo gaari la'haa.

Baaritaanka ciyaalka dhashey ma ahan mid khasab ah. Waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay daryeel caadi ah ee ubad kasta oo si aad u sareysa ayaa lagu taliyaa. Waxaad xaq u leedahay in aad kala doorato oggolaansho ah in dhallaankaaga laguu baaro ama aad iska diido. Waxaa dhici karta in aad jeceshahay in arrinkan dhakhtarkaaga aad kala xaajooto. Baaritaanka dhallaanka cusub waa qaabka kaliya ee lagu oggaan karo carruurta qaba cuduradan si waqti hore looga hortaggo dhibaato caafimaad daro, oo muddo dheer ah.

Baaritaan yar oo, manfac weyn dhaliya

Si loo qabto baaritaankan, dhiig yar oo tijaabo ah ayaa canugaaga laga qaadayaa. Waxaa badanaaba la qaadaa in u dhaxeysa 24-72 saac ka dib marka uu dhallaanka dhasho iyadoo ibta la dhiggo oo dhiiggana la saaro warqad kaar oo gaar ah. Waa in lagu siiyaa warqad macluumaad oo ay la socoto lambar tixraac ah oo ay dusha kor ku qoran tahay. Lambarkan waxaa loo isticmaali karaa in lagu xiriiriyo tusmada dhallaankaaga. Tusamada ayaa ka dib waxaa loo dirayaa Newborn Screening Ontario (NSO) halkaasoo lagu soo baarayo 29 cuduro dhif ah oo ay ku jiraan:

- Cudurada Metabolic-ka
- Cudurada Qanjiirka dhiigga
- Cudurka ku Dhaca Unugyada Dhiigga (SCD)
- Sambab-galeenka la kala Dhaxlo (CF)
- Calaamadaha Daran ee Yaraanshaha habka Daafaca (SCID)

Somali: Newborn Screening and Your Baby Catalogue # 018599 December 2013 © Queen's Printer for Ontario 2013

Ontario

Cudurada oo wada tixan waxaad ka aqrin kartaa bogga internetka ee NSO
www.newbornscreening.on.ca

Natiijooyinka baaritaanka: halis sareysa iyo halis hooseysa

Natiijooyinka baaritaanada waxay muujin doonaan haddii dhallaankaaga yahay mid ay sareyseyso ama ay hooseyso halista cudurada, laakin iyagu ma ahan baaritaano haa ama maya ah (sidoo kale loo yaqaan "oggaansho" baaritaanno). Haddii ay abad dhacdo dhallaankaaga uu la yimaado ifafaalooyin cudur, dhallaankaaga takhtarkiisa waa in ay baaritaan oggaansho ee ku haboon waa in iyugu ay sameeyaan. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la xusuusto in baaritaanka dhallaanka dhashey aysan ka baareyn dhammaan dhibaatooyinka caafimaad darada.

Natiijada baaritaanka ee wax lagu arkowaxay micnaheedu tahay in fursadda ah in dhallaankaaga uu qabo mid ka mid ah cudurada yahay mid hooseeya oo looma baahna baaritaan kale oo dabagal ah. In ka badan 99% oo ah dhallaanka la baarey natiijadooda baaritaanka waa mid wax laga waayo.

Natiijada baaritaanka wax laga helowaxay micnaheedu tahay in dhallaankaaga uu qabo fursad sareysa ee ah inuu qabo mid ka mid ah cudurada oo baaritaanno dheeraad ah u baahan yahay. Muhiim ma ahan in ay taasi micnaheedu tahay in ubadkaaga uu cudur qabo. Marka arrinka sidan yahay, takhtaatiirta Newborn Screening Ontario (NSO) ayaa dhallaankaaga wuxuu u gudbin doonaa takhasusle gaar ah si baaritaanka loo dabagallo. Waxaa xiriir kula soo yeelan doona bixiyahaaga daryeelka caafimaadka (health care provider (HCP)) ama takhasusle haddii natiijaada baaritaanka dhallaankaaga wax lagu arko.

Waxaa dhici karta in lagu weydiisto in dhallaankaaga aad dib u soo celiso si loogu celiyo tijaabada baaritaanka Tani waxay dhici doontaa haddii:

-Haddii tusamada baaritaanka koowaad ee dhallaankaaga la qaadey ka hor marka 24 saac uu jirsaday

-Aannan la qaadin dhiig ku filan

-Tayada tijaabadii ayaa hooseeysey

Isbitaalkaaga ama umulisadaada ayaa xiriir kula soo sameyn doonta haddii loo baahdo in tijaabada lagu celinayo. Waxaa muhiim ah in baaritaanka lagu celiyo sida ugu dhaqsaha badan si markaa dhallaankaaga uu u helo manfaca baaritaanka dhallaanka cusub oo buuxa. Ubaahashada in tijaabada lagu celiyo micnaheedu ma ahan in dhallaankaaga wax ka qaldan yahay.

Natiijooyinka isbitaalka ama HCP ee baaritaanka sameeyey ayaa waxaa loogu dirayaa, boostada ama qaab elegtroonig ahaan iyada oo loo marinayo Nidaamka Macluumaadka Shaybaarada Ontario ((Ontario Laboratories Information System (OLIS). Dhallaankaaga takhtarkiisa (HCP) ayaa waxaa dhici karta in ay helaan natiijada iyaga oo OLIS loo marinayo. NSO natiijooyinka si toos ah waalidiinta/mas'uuliyiinta uma diraan.

Ma dhici kartaa in baaritaanadan ay sheegaan cuduro kale?

Mar marka qaarkood baaritaanada waxay sheegayaan in dhallaanka uu qabo cudur aannan ka ahayn 29 cuduro ee la tiigsanaayay. Haddii ay dhacdo in la helo mid kan oo kale ah, takhasusle ayaa arrinkan kaala xaajoon doona.

Baaritaanka Cudur ku Dhaca Unugyada Dhiiga (Sickle Cell Disease) waxaa dhici karta inuu in lagu oggaado haddii dhallaankaaga uu qaade yahay (sidoo kale loo yaqaano sifo). Carruurta ah kuwa wata way caafimaad qabaan oo daaweyn gaar ah uma baahna. Natiijooyinka qaadaha waa la heli karaa iyada oo la soo dalbado. Macluumaadka ah sida aad ku heli karto natiijooyinka qaadaha dhallaankaaga waxaad ka heleysaa bogga internetka ee NSO - ama, weydii daryeel bixiyaha caafimaadka dhallaankaaga.

Dhoorista macluumaadka iyo xogta dhallaankaaga

NSO waxaa u heellan tahay in dhallaankaaga tusmadiisa dhiigga iyo macluumaadkiisa ay asturto oo ay xafiddo, iyada oo la raacayo xeerarka sharci ee ku saabsan urrurintooda iyo isticmaalkooda. Waxaa loo isticmaali karaa daryeel caafimaadka, ka baaraandegidda, hubinta tayada iyo cilmi baarista. Macluumaadka caafimaadka shaqsiga (PHI) waxaa isla wadaagga daryeel bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee kaalinta ka qaata baaritaanka dhallaanka dhashey iyo oggaanshaha nooca si loo hubiyo in ubadkaaga uu helo daryeelka iyo dabagalka uu isaga ama iyada ay ubaahan tahay. PHI sidoo kale OLIS ayay la wadaagtey. Waxaa dhici karta in la wadaaggo macluumaadkan aaddan dooneyn, marka sidaasi tahay, fadlan waxa aad jeceshahay u sheeg takhtarkaaga (HCP) iyo/ama NSO la xiriir.

Goorta baaritaanka la dhammeeyo, tijaabada dhallaankaaga waxaa lagu xareynayaa meel amaan ah oo qeyb ka ah diiwaangelinta caafimaadka dhallaankaga. Waxaa la keydin doonaa 19 sanadood oo ka dibna waa la baabi'in doonaa. Tusmooyinka waa la xareyn doonaa si markaa loo isticmaalo si loo hubiyo in baaritaanada dhallaanka dhashey in ay si habsami ah u shaqeynayaan. Tani waxay faa'ido u tahay dhallaankaaga iyo dhammaan carruurta reer Ontario. Mar marka qaarkood tusamada dhallaanka mustaqbalka ayaa takhtarkiisa/eeda ayaa waxay ugu baahan yihiin si ay baaritaanno dheeraad ah u sameeyaan. Keydinta tusmooyinka waxay micnaheedu tahay waa diyaar haddii loo baahdo. Suurtogalnimada kale ee isticmaalka tusmooyinka la keydiyay waxaa ka mid ah baaritaano ay sameeyaan sheybaaro kale oo aad adigu soo dalbato, in NSO qameyso baaritaanno cusub ama kuwa hormarsan, iyada oo markaa isticmaalaysa awood siin sharci ah ama amar maxkamadda ay soo saartey, iyo cilmi baaris uu ansaxiyo guddiga anshaxa cilmi baarista. Guud ahaan, macluumaadka dhallaankaaga ku xiri kara tusmooyinka dhiigga ee la qaadey waxaa kaliya la wadaaggi doonaa haddii aad adigu qoraal ahaan oggolaato ama haddii shaciga uga baahdo.

Haddii aad doorbideysid in aannan la keydin tusmaha dhallaankaaga, NSO ayaad weydiisan kartaa in ay burburiso tusmada ama adiga ku siiso. Macluumaad dheeraad ah fadlan NSO la xiriir.

Macluumaad Dheeraad Ah

Haddii aad qabto wax su'aallo ah oo ku saabsan baaritaanka dhallaanka cusub ee Ontario ku dhashey, fadlan la hadal bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ama si toos ah ula xiriir*Baadhitaanka Ilmaha dhawaan Ontario ku dhashay*

Bogga internetka
www.newbornscreening.on.ca

Talefoon
Qatka Bilaashka: 1-877-NBS-8330
(1-877-627-8330)
8:00 AM - 16:00 PM

Emailka
NewbornScreening@cheo.on.ca

Cinwaanka Boostada:
Newborn Screening Ontario
Children's Hospital of Eastern Ontario
415 Smyth Road
Ottawa, Ontario K1H 8M8

Twitter
@NBS_Ontario